



17 March 2020

### ***ASalamu caleykum waraxmatulahi wabarakaatuhu***

Waalidiinta xushamda leh

### **Xanuunka corona fayras -2019, Talooyinka iyo qorshayaasha degsan**

Waxaan idiinla soo xidhiidhay maanta inaan idin siiyo warbixin iyo kalsooni buuxda xiligan adag ee aan xaalku deganayn .  
Isbedelada dhaqaha badan ee xanuunka corona-virus-19 waxaa hubaal ah inuu keenayo cabsi iyo wer wer.

Anigoo ah maamulaha iskuula AIIIC waxaan xil iska saarayaa oo aan rabaa inaan kalsooni siiyo bulshada iskuulka ku xidhan .

Waxaan qaadayaa talaabo kasta oo lagu xaqiijinayo badqabka caafimaad iyo fayoobaanta ardayda iyo bulshada guud ahaan.

Weliba waxaanu diyaarinay qorshe ku aadan xiligan adag ee aan deganayn.

Aan idiin cadeeyo anoo kucelinaya “ilaa hada majirto cid la cadeeyey oo xanuunkaas qabta corona-virus-2019 ama cid looga shakiyey iskuulka AIIIC”

### **Calaamadaha lagu garan karo Corona -virus -2019**

- Qandho ama xumad
- Dhuun xanuun
- Qufac qalalan ( aan xaako lahayn)
- Neef qabad( neefsiga oo qofka dhiba)

Hadaad calaamadahaas isku aragto la xidhiidh dhaqatarada ,meel cidlana uga bax dadka (is karantiil) ilaa dhaqatar ku fasaxo.

### **Fariinta caafimaad ee Ardayda loo gudbinayo**

Ardaygii xanuun dareemaa guriga hajoogo

Ardaygii isagoo iskuulka jooga xanuun dareema guriga ayaa loo dirayaa (xataa hadii xanuunka hayaa xiriir lalahayn calamadaha corona-virus). Arday jiran iskuulka majoogayo.

Waalidka, Hadii lagu soo waco si aad ilamahaaga u qaadato waa inaad diyaar u tahay si markiiba aad u timaado.

### **Dhowrista caafimaadka ee Ardayda intay iskuulka joogaan**

Saaka waxaan soo saaray amar ah in wixii hawl ah ee aan waxbarshada muhiimka ahayn, la joojiyo ama dib loo dhigo. Arintani waxay qayb katahay fulintra amar ay wasaarada waxbarshadu soo saartay oo ku saabsan ,inta laysu jirsanayo qiyaastii meelaha lagu kulmo ama bulshadu is dhexgasho.

Arintani maaha mid ardayda keliya caawinaysa ee waa mid qoysaska iyo bulshada guud ahaan caawinaysa.

Taas macnaheedu waxaa weeye hada kadib waalidiinta waxaan u sheegi doona inay ilamahooda iskuulka keenaan ,laakiin aysan gelin claasyada ama fasalada ardaydu ku jirto . Lama ogola in meel lagu ururo oo lays tubo iskuulka guduhiisa .

Kulamada ama hawlaha la joojiyey waxaa kamid ah

- **Harmoney day** (maalinta isdhexgalka dhaqamada ama bulshooyinka)
- **Dabaashii** waa la hakiyey ilaa mudo aan lacayimin
- **Tartankii orodka** dib ayaa loo dhigay
- **Tartankii quraanka** dib ayaa loo dhigay (*laakiin maadaama ay arin muhiim ah tahay dib ayaa laga qaban doona marka xaalku hagaago*)
- **Hawlahii kala gedisnaa** ee sikuuladu sida gaar-gaarka u qaban jireen ee aan toos waxbarshada uga midka ahayn waa lajoojiyey ama dib ayaa loo dhigay

## Saladaha iyo khudbada Jimcaha

### Saladaha

- Ardayga bilowga ah(prepare) – claaska 4 aad (Yr 4)

Meel loogu talo galay oo ay kutukanayaan majirto(*laakiin xor bay u yihiin qof -qof inay ugu tukadaan fasalkooda ama claaskooda*)

- Claasyada 5aad -12aad (Yr5-Yr12)

Waxay ku tukanayaan claasyadooda ama fasaladooda waxaana tujinaya imaamyada iyo horjoogayaasha YR 12 ka

Ardaydu dhamaan waa inay la yimaadaan **sijaayadahii** ay ku tukan lahaayeen ,galabtiina waa inay guriga u qaataan.

### khudbada Jimcaha

Salaadihii jimcaha(qudbada) joogtada ahaa waa la joojiyey ,sidaa awgeed waalid ama ehelka kale ma iman doonaan iskuulka si ay ugu tukadaan salaada jimce

- **Ardayga bilowga ah (prepare-4aad )** majirto meel loogu talo galay inay kutukaadan jimcaha (*laakiin waa xor haday rabaan inay keli -keli inay claasyadooda ugu tukadaan*)

- **Claaska 5aad -12aad (Yr5-Yr12)**

**Wiilashu** waxay kutukanayaan jimcaha, barandada claasyadooda kutaal ama ku dhegan waxaana tujinaya imaamyada waqtiga 12:45Pm.

- **Gabdhuhu** claaska 5aad -12aad waxay joogayaan claasyadooda (*haday rabaana si gaar-gaar ah ayay u tukan karaan*).

### **Qorshaha u sii degsan in hadii loo baahdo in guriga waxlagu barto**

Xiligan adag ee aan deganayn waxaan idiin xaqiijinaynaa inaan hawl adag kujirno, si aan ugu diyaargarawno haday noqoto in iskuulka la xidho ,hadii laga maarmi waayo ,

#### **iskuulka waxaa la xidhayaa**

- Hadii Qof xanuunka lagu cadeeyo
- Taxadar ahaan si loo yareeyo khatarta iskuulka iyo bulshada guud ahaan.

Ilaa hada majiro qorshe ama amar lagu xidhayo iskuulka ,laakiin hadii xaaladu kelifto waxaan idiin cadaynayaa in waqtigan aan idinla hadlayo macalimiintu gacanta ku hayaan qorshe loogu tala galay in aradaydu guriga wax kubartaan hadii iskuulka la xidho.

Duruusta loo diyaariyey aradaydu waxay ka koobantahay howlo isku dhexjira oo ay kamid yihiin waxyaalo horumarinaya ama sahlaya barshada.

Shaqooyin ama Casharo cusubi kuma jiraan

Qiimayntii wax kabadel ayaa lagu sameynayaa ,si aan ardayna waxba u seegin,haduu doorto inuu guriga wax kubarto.

Qorshaha waxbarshada ee guriga waxaa ardayda loo qaybin doona wiigan dhexdiisa ,waa in ardaygu boorsadiisa ku haystaa ,si haduu ubaahdo guriga waxbarshada uga wato.

#### **Waalidka waxaan uga baahanahay**

Marka hore waxaa qiimo weyn ii leh kalsoonida aad iisii seen aniga iyo dadka ila shaqeeya inaan hogaamino iskuulka xiligaan adag, waxaana idinka codsanayaa dulqaad iyo Isfahan.

#### **Intaas kadib waxaan rabaa**

- Hadii ilamahaagu jiran yahay guriga ku hay
- Mar walba nala socodsii xidhiidhkaaga sida addresska ,telefonka ,email.  
Waa arin muhiim ah.

Waxaan rabaa inaan idiinla hadlo sidii AIIIC qoys ahaan

Makala nihin ,arday, waalid ,shaqaale i.w.m (laakiin waxaynu nahay QOYS keliya).sidaa darteed waa in aynu isku tiirsanaano waqtigan adag.

Waxaan idinku boorinayaa inad raacdaan talooyinka dadka ka shaqeeya caafimaadka.

Inaad ilaalisaa naftiina , qoysaskina iyo dadka aad jeceshihiin waxaan mar labaad idin weydiisanayaa garab galkiina iyo kalsoonidiina waqtigan adag.

Waxaan inoo baryayaa in horteenaa la dhigo nuur , wanaag iyo debecsanaan.

*InshaAllah*



Christine Harman  
Principal